
# Macluumaadka Dadweynaha u Furan Lala Barbardhigay Kan Gaarka Ah

Public vs. Private Information: Diiwaanka Fal Dambiyeedka

## Waa maxay macluumaadka taariikhda fal dambiyeedka ee dadweynuhu arki karaan?

Macluumaadka faldambiyeedka qofka lagu helay waxaa laga heli karaa Minnesota Court Records Online (MCRO), iyo Waaxda Dambi Baarista (BCA). Diiwaanka fal dambiyeedka ee BCA waa mid dadweynaha u furan muddo 15 sano ah ka dib marka qofka la xukumo.  Laakiin diiwaanada qof lagu helo fal dambiyeedka waa kuwo si joogta ah looga heli karo MCRO.




Macluumaadka dadweynaha waxaa ka mid noqon kara:

- Dambiyada lagugu soo oogay
- Taariikhda dambiga lagugu soo oogay
- Degmadda kiiska dambiga ah lagaaga soo oogay
- Natiijada (oo lagu magacaabo go’aan gaaris)
- Hay’adda kor kala socoshada ama goobta qofka lagu xiray.
- Wax kasta oo maxkamadda laga diiwaan geliyey oo aan laga qarin dadweynaha

## Xiritaanka la i xiray ma macluumaad dadweynaha arki karaan?

Tariikhda xariga waa mid aad u adag. Taariikhda xiritaanka waa mid dadweynuhu arki karaan ee saldhiga booliska ama sherifka. Laakiin mar kasta sidaas ma aha. Qeybaha qaarkood waxa ay ka dhigaan mid macluumaadka si fudud lagu heli karo halka aysan kuwo kale ka dhigin sidaas. Ma jiro sharci u degsan arrintaas, ee waa mid ku xiran meesha aad degan tahay.

Waa run in macluumaadka xiritaanka aysan aheyn mid dadweynaha arki karaan BCA LAAKIIN, BCA way u gudbisaa maclumaadka xiritaanka goobaha shaqada iyo mulkiilayaasha guryaha oo fasax u heysta in ay eegaan taariikh nololeedkaaga.

## Waa maxay macluumaadka gaarka ah?

Dambiga qof lagu helay oo ay ka soo wareegtay 15 sano tan iyo markii la xukumay waa mid gaar ah BCA laakiin waa mid dadku arki karaan waligood MCRO.


Qaar ka mid ah qoraalada laga diiwaan geliyo maxkamadda waa kuwo laga dhigo “qarsoodi” sharci ahaan oo aanay arki karin dadweynaha. Qoraaladaas waxaa ka mid ah kuwa maaliyadda ama diiwaanka gaarka ah ee caafimaadka.

Diiwaanka caruurta waxaa loo arkaa inuu yahay mid gaar ah. Waxaa jira waxyaabo ka baxsan taas oo marka ilmaha da'diisu tahay 16 ama ka weyn oo lagu qaaday dambi culus. Xaaladahaas oo kale, waxaa jira dhageysi dadweynaha u furan, xitaa haddii ilmaha lagu qaaday dambiga culus. Diiwaankaas waxa aad ku arki kartaa maxkamadda. Lagama **heli** karo barta internetka.

## Yaa arki kara diiwaanka dadweynaha u furan?

Qof kastaa ayaa arki kara diiwaanka dadweynaha u furan Waxa aad ka heli kartaa xafiiska BCA adiga oo isticmaalaya kombiyuutarada yaala afaafka hore ee xafiiska.

Diiwaanka maxkamadda ee dadweynaha u furan sidoo kale waxaa laga heli karaa barta internetka ee kedyka MCRO.



→ Waxa aad Keydka MCRO ka geli kartaa halkan: https://publicaccess.courts.state.mn.us/CaseSearch

→ Ama akhri macluumaadka oo raac tilmaamaha halkan : https://publicaccess.courts.state.mn.us/



## Yaa arki kara diiwaanka gaar ah?

Macluumaadka gaarka ah ee qofka waxaa la arki kara oo kaliya oo arki karaan dad gaar ah iyo xaalado gaar ah. Dadka kaliya ee arki kara macluumaadka gaarka ah waa:

- Qofka diiwaanka leh. Qofkani waa qofka akhbaarta xafidani ay ku saabsan tahay. Waxa uu ku heli karaa qofkaas diiwaanadiisa Mail-in Personal Request Form. *(Codsiga Shakhsiga ee Foomka Boosto soo Dhigida)*

- Hay'adaha garsoorka ujeedo la xiriirta dacwadaha fal dambiyeedka

- Shaqsiyaadka iyo hay'adaha loo xilsaaray ogaashaha taariikhda fal dambiyeedka.

- Qof kasta oo heysta foomka ogolaashaha Informed Consent Form (Foomka Ogolaashaha) uu soo saxiixay qofka leh macluumaadka oo nootayada soo mariyey.

- BCA ma sii gudbiso macluumaadka gaarka ee caruurta, xitaa haddii uu ogolaado qofka uu khuseeyo macluumaadka.

Waxa aad ku waydiisan kartaa taariikhda fal-dambiyeedyadda adiga ama cid kale xafiiska BCA da, boostadda ama khadka (online) adigoo galaya barta https://dps.mn.gov/divisions/bca/bca-divisions/criminal-justice-information-services/background-checks/public.

Akhri xogta urursan *Diiwaanka Fal dambiyeedka* si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**